# Ku saabsan bay'adda goobaha gudaha ee gurigaaga ku yaalaan

*Dhibaato miyaa ka haysato bay'adda goobaha gudaha ee gurigaaga ku yaalaan? Dhibaatada waxay noqon karta arrin xiriir la leh qaboow, cilladda hawo siinta, qoyaan iyo caaryaal, buuq, cayayaan ama radon. Xaaladaas marka hore la xiriir aqal-kireyahaaga ama ururka is-kaashatada guryaha.*

*Haddii lagu caawinin ama haddii dhibaatada weli ay jirtio, nala soo xiriir anaga oo ah maamulka arrimaha bay'adda. Sidaas kale, wixii su'aallo ah waad nalaga soo xiriiri karta.*

*Waxaan halkaan kugu wargelinaynaa sida la doonaayo in uu ahaado bay'adda gurigaaga, iyo waxa aad aqal kireyste ahaan ka qaban karto.*

## Heerkul hawada




Heerkulka guriga dhexdiisa waa in usan ka hoosayn 20 °C darajo.

### Tallaabooyinkaan aya ka qaadi karta:

- Guriga dhigo cabbiraha heerkulka, sidaas ayaa ku ogaan karta heerka qaboowga ee guriga dhexdiisa.

*Haddii qalabka cabbiraha darajooyinka u guriga ku yaallo waxaad ogaan karta heerka darajada kuleelka.*

## Heerkulka biyaha

Heerkulka biyaha ku dhexjira qalabka biyaha waa in aysan ka hoosayn 60 °C darajo. Tan kale biyaha kulul ee ka soo qulqulaayo tubooyinka waa in aysan ka hoosayn 50 °C darajo. Sidaas ayaa looga hortegi kara in jeermisyada [legionella] ku tarmaan hab-dhiska biyaha. Waxaa kaloo muhim ah in biyaha qaboow ay qaboow yihiin.

### Tallaabooyinkaan aya ka qaadi karta

- La xiriir aqal-kireyahaaga ama ururka is-kaashatada guryaha haddii dhibaato ay ka haysato heerkulka biyaha.

## Layrinta iyo tayada hawada

Waa in gurigaaga u leeyahay layrin fiican. Layrinta waxay suuragelinaysa in hawo fiican ay guriga soo gasho, tan xun dibada u baxdo. Calaamadaha cilladaha layrinta waxaa weeyaan ur joogto ah. Waa in marna aad gurigaaga ka dareemin carafta cuntada iwm ee deriskaaga.

### Tallaabooyinkaan aya ka qaadi karta:

- Sida hawo nadiif oo fiican guriga ku soo gasho awgeed, waa inaad hubsata in meelaha hawada ay ka soo gasho ay furan yihiin.
- Ku dadaal inaad nadiifiso miiraha marawaxada jikada, taasoo ka hortagayso hoos u dhaca tayada hawada.
- Ku dadaal nadaafadda gurigaaga. Tayada hawada sare ayay u qaadi karta haddii aad ku dadaasho in guriga aad ka nadiifiso habaasta/boorka.



*Ku dadaal nadaafadda shayga hawo-siinta ee gidaarka musqusha ku degan.*

## Qoyaan iyo caaryaal

Gurigaaga waa inaad ka ciribtirta qoyaanka iyo waxyeelada caaryaalka. Meelaha qoyaanka ah ama aan layrin fiican ka jirin waxay yeelan karaan caaryaal.

Calaamadaha lagu garto waxyeelada caaryaalada waxaa weeyn ur xun, barayaal ka soo ifbaxa saqafka ama gidaarada iyo goobaabin ka soo ifbaxaan xaanshiyadaha gidaarada lagu qurxiyo ama sagxadda. Waxyeelada caaryaalka waa in sida ugu dhaqsida badan wax laga qabta.

Postadress: Uppsala kommun, miljöförvaltningen, 753 75 Uppsala
Besöksadress: Ulls väg 28 (förbokade besök) • Telefon: 018-727 00 00 (växel)
E-post: miljoforvaltningen@uppsala.se
www.uppsala.se

### Tallaabooyinkaan aya ka qaadi karta

- Haddii aad shaacbixiso calaamooyinka waxyeelada caaryada, waa inaad daahid la'aan wargelisa aqal-kireyahaaga ama ururka is-kaashatada guryaha.

## Shanqar

Dhawaaqa aan dhibsanno ayaa waxaa la dhaha shanqar. Waxaa jiro nidaam u degsan heerarka shanqarta iyo saacadaha. Shanqarta la dhibsado waxaa tusaale ahaan sabab u noqon karto goobaha dharka lagu dhaqdo, goobaha hawlaha ka socdaan oo agagaarka ku yaalaan ama marwaxadaha.

### Tallaabooyinkaan aya ka qaadi karta

Haddii aad dhibsanayso shanqarta dhaqdhaqaaqa agagaarkaaga, waa inaad marka hore la xiriirta maamuleha dhaqdhaqaaqa. Haddii aad dhibsanayso shanqarta daarta aad degan tahay waa inaad la xiriirta aqal-kireyahaaga ama ururka is-kaashatada guryaha.

## Cayayaanada

Gurigaaga waa in aan laga helin dooli, baranbarro, dhiqle ama cayayaanno kale.



*Waa in dhiqle usan gurigaaga ku noolayn.*

### Tallaabooyinkaan aya ka qaadi karta

- Markii aad cayayaan gurigaaga ka hesho waa inaad daahid la'aan wargelisa aqal-kireyahaaga ama ururka is-kaashatada guryaha.

## Radon

Heerarka sare ee radon durbadiiba halis ma keenaan, laakin goor dambe ayay waxyeeli karaan caafimaadka haddii aan waxba laga qaban. Sida lagu ogaado heerka radon awgiis waa in shirkadda guriga iskaleh, ay ku dhaqaaqda cabbirida heerka radon qaar kamid ah guriga.

Haddii heerka calaamadda tixraaca ee radon ee gurigaaga ama guri kale ee isla daarta ku yaallo u ka sareeyo 200 $Bq/m^{3}$, waa in milkilaha hanti ma guurta u wax ka qabta sidii heerkaas hoos loogu dhigi lahaa. Wax ka qabashada kaddib waa in milkilaha hanti ma guurta uu cabbiraad cusub ku dhaqaaqa oo u hubsada hoos u dhaca heerka radon.

### Tallaabooyinkaan aya ka qaadi karta

- Waxaa mar kasta muhim ah in ay furan yihiin meelaha hawada laga saaro iyo meelaha laga soo geliyo. Haddii ay meelahaas ay xiran yihiin waxaa jirto halista in heerka radon u cirka isku shareero gurigaaga.

## Nala soo xiriir

Haddii aad su'aallo na waydiin lahayd, u baahan tahay warbixin dheeraad ama aad doonayso inaad na wargeliso, xaaladaas nalaga soo xiriir anaga oo ah maamulka arrimaha bay'adda.

Taleefan: 018-727 43 04,
isniin-khamiis 9.00 - 11.00
E-mail: miljoforvaltningen@uppsala.se